



QALALAASADA KU SALEYSAN JINSIGA (GBV)

WAA MAXAY XADGUDUBKA KU SALAYSAN JINSIGA?

Qalalaasada ku saleysan jinsiga (GBV) waxaa lagu qeexaa hanjabaad kasta oo waxyeello leh ama fal lagula jeedo shaqsi ama koox iyadoo lagu saleynayo sida dhabta ah ama ay u arkaan:

- Jinsiga noolaha
- Cadeynta jinsiga
- Qeexida jinsiga
- Rabitaanka galmo; ama
- Kala duwanaanshaha caadooyinka bulshada ee la xidhiidha raganimada ama dheddigga.

Dembiilayaasha waxay noqon karaan saraakiisha dawlada ama ururo, shakhsiyeed ay ku jiraan xubnaha qoyska, hoggaamiyeyaasha diinta, kuwa kale oo laga yaabo inaad taqaan, ama aan la garaneyn. GBV waa sida dil aan sabab laheyn, jirdil, xadgudub galmo, iyo guur qasab ah ayaa sidoo kale loo isticmaali karaa xeelad dagaal ama xilliyada xasillooni darada bulshada.

TUSAALOYINKA GBV

Noocyada caadiga ah ee GBV waxaa ka mid ah:

- qalalaasaha qoyska
- qalalasaha shukaansiga
- gudniinka fircooniga ah ama jarista (FGM/C)
- daba-galka
- guurka khasabka ah
- qalalaasaha galmada, oo ay ku jiraan xadgudubka galmada, weerarka, iyo dhibaateynta

GARGAAR QARSOON OO LAGA HELI KARO LUQADAADA

- Khadka Qalalaasaha Qoyska ee Qaranka 800-799-7233, 800-787-3224 (TTY ee dadka dhegaha la' ama maqalka culus)
- Khadka Tooska ah ee Xad-gudubka Galmada iyo Kufsiga, Xadgudubka iyo Xidhiidhka Qaran (RAINN) ee qadka Qaranka 800-656-4673
- Khadka ka ganacsiga dadka ee Qaranka 888-373-7888
- Hindisaha Guurka Qasabka ah ee Xarunta Cadaalada Tahirihi 571-282-6187 ama FMI@tahirihi.org
- Khadka Tooska ah ee Xadgudubka Ilmaha Qaranka ee Caawinta Ilmaha 800-4-A-CHILD (800-422-4453)
- US Joojinta Gudniinka Fircooniga ah ee shabakada info@endfgmnetwork.org

